

COVID-19

wargelinta dagganeyaasha



Abril 27, 2020

Casriyeynta macluumaadka ku saabsan qafiifinta kirada

Haddii aad lumisay dakhliga kaa soo gala shaqada taasoo ugu wacan COVID-19, waxaad xaq u leedahay brograamka qafiifinta kirada. Haddii aadan luminin dakhliga, xaq uma lihid, waxaadna bixin doontaa kirada buuxda maalinta kowaad ee bil kasta.

Diraha COVID-19: Horaanta bishii Abril, waxaan warqado boostada ugu soo dirnay mid kasta oo ka mid ah reeraha daggan Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) (TCHC), waxaan u soo raacinay macluumaad ku saabsan brograamka qafiifinta kirada. Waxaa ka mid ah foomamka habeynta kirada ama dib u dhigidda iyo foomka Fiirinta Hantida iyo Dakhliga Reerka (Household Income and Assets Review). Tani **MA** aha fiirinta kirada reerkaada ee la sameeyo sannadkii hal mar. Warqadaha waxaa loogu talagalay dagganeyaasha lumiyay dakhliga shaqada, taasoo ugu wacan COVID-19, ee raba in ay dalbadaan taakuleynta kirada.

Taakuleynta la siiyo reeraha bixiya kirada-ku-saleysan dakhliga (rent-gearred income) (RGI): Waan kula shaqeyn doonaa si dib loo xisaabo kiradaada taasoo ku saleysan isbaddalka ku dhacay dakhligaada.

Taakuleynta la siiyo reeraha bixiya kirada suuqa: Waxaan bixinaa fursado in dib loo dhigto qeyb ka mid ah kirada. Waxaad dooran kartaa in aad bixisid hal meel-saddax meel, bar ka bar ama saddax meel-afar meel kiradaada ilaa muddo saddax bil, kaddibna waxaad baaqiga ku bixin doontaa muddo lex ilaa sideed bil lagu darray kiradaada caadiga.

Dhamaan reeraha waa in ay la yimadaan warqado caddeeya dakhliga ka lumay. Waan kula shaqeyn doonaa haddii aadan haysanin warqado, hase ahatee waxaa loo baahan yahay in aad soo gudbisid warqadaha goor dambe.

Si aad u heshid macluumaad badan, ama si aad u heshid foomamkaan, la xariir Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), **telefoonka 416-981-5500** ama tag torontohousing.ca/covid-19.



Wac **416-981-5500** si ogeysiiskan laguugu soo diro luqad ama qaab kale.